Hadii Qof idinka mida uu wax cunayo ha ku cuno Midigtiisa, haduu wax cabaayana ha ku cabo Midigtiisa, waayo Shaydaanku wuxuu ku cunaa Bidixdiisa wuxuuna ku cabaa Bidixdiisa

Ibnu Cumar Allaha ka wada raali ahaado isaga iyo Aabihiye waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee uu yiri: "Hadii Qof idinka mida uu wax cunayo ha ku cuno Midigtiisa, haduu wax cabaayana ha ku cabo Midigtiisa, waayo Shaydaanku wuxuu ku cunaa Bidixdiisa wuxuuna ku cabaa Bidixdiisa".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee wuxuu faray inuu Qofka Muslimka ahi wax ku cuno kuna cabo Gacantiisa Midig, wuuna reebay in wax lagu cuno laguna cabo Gacanta Bidix, waayo Shaydaankaa kuna cuna kuna caba Bidixda.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/58122